# SHURUUDAHA DEYNTA GUUD EE LA QEEXAY

**Jadwalka dib u bixinta deynta:** Jadwalka dib u bixinta deynta waa jadwalka bixinta deynta waqti ka dib iyada oo loo marayo lacag bixin joogto ah. Waxay ku salaysan tahay heerka dulsaarka iyo muddada. Jadwalka dib u bixinta deynta ama jadwalka waxay tusinaysaa qadarka lacag bixin kasta oo la dul dhigay daynta iyo dulsaarka iyo waqtiga daynta la bixin doono. Amaahda qaarkood waxay leeyihiin shuruudo ka gaaban jadwalka dib u bixinta daynta, taas oo macnaheedu yahay in marka deyntu dhammaato (ama "waqtigeeda la gaaro"), weli waxaa jiri doona hadha deyn.

**Xisaabaadka La Bixin karo:** Wadarta cadadka uu ganacsigu wali ku leeyahay kuwa kale alaabta ama adeegyada hore loo helay waxa loo yaqaan xisaabaadka la bixin karo. Lacagahan lama bixin waxaana loo sababeynayaa sida waajibaadka muddada gaaban ee ka muuqda xaasida dheelitirka si in lagu leeyahay ganacsi ama hay'ad kale.

**Xisaabaadka la heli karo:** Wadarta guud ee lacagta ay macaamiishu ku leeyihiin ganacsi alaab ama adeegyo hore loo bixiyay balse aan wali la bixin waxa loo yaqaan xisaabaha la heli karo waxayna ka dhigan tahay xaddi ganacsigu filayo inuu ururiyo mustaqbalka. Maaddaama lacag-bixinta aan weli la soo qaadin, qadarka lacagta ah ee ku waajibtay waxay noqotaa hantida ganacsiga tan iyo markii ay filayso inay hesho lacag bixinta.

**Hantida:** Waa shay qiimo lacageed oo togan leh oo uu leeyahay qof ama ganacsi. Waxaa jira noocyo badan oo hanti ah. Hantida qaar waa la taaban karo (tusaale, dhul, baabuur, qalab, agab) iyo qaar aan la taaban karin (tusaale, hantida garaadka). Hantida waxa loo isticmaali karaa dammaanad ahaan si loo helo dayn.

**Xaashida dheelitirka:** Waa qoraal xisaabeed soo koobaya hantida iyo deymaha ganacsi ama hay'ad wakhti xilled. Farqiga u dhexeeya wadarta hantida iyo wadarta deymaha waxaa loo yaqaan "qiimaha dhaqaale" ama "qiimaha saafiga ah".

**La-taliyaha Ganacsiga:** Waa qof bixiya la-talin ganacsi ama tababarid marka uu qof ka shaqaynayo qorshahIISA ganacsi, qorshe suuq gayn, odoroska maaliyadeed, iyo waxyaabaha la xidhiidha. Waxay bixiyaan khibrad ku saabsan hababka ugu fiicanee hababka maaraynta maaliyadda, farsamooyinka, iyo qalabka. La-taliyayaasha ganacsiga ayaa ku caawin kara labadaba ka hor intaadan codsan iyo ka dib markaad hesho amaah.

**Dammaanad/Rahaamad:** Waa hanti ama hanti ma guurta ah oo uu amaahiye siisay dayn-bixiye si ay u noqoto dammaanad dayn, taas oo uu qaadan karo dayn-bixiyuhu haddii ay dhacdo in la bixin waayo.

**Kaarka deynta:** Waa kaar ay bixiso hay'ad maaliyadeed kaas oo kuu ogolaanaya inaad lacag ka amaahato xad hore loo ansixiyay oo aad ku bixinayso alaabta iyo

adeegyada. Xadka amaahda waxaa go'aamiya hay'adda bixinaysa kaadhka iyadoo lagu saleynayo dhibcaha deynta iyo taariikhdaada.

**Shaqaale waqti-buuxa ah (FTE):** Hal shaqo oo waqti-buuxa ah oo leh ugu yaraan 30 saacadood oo shaqo ah todobaadkii waxay la mid tahay hal FTE.

**Dakhliga Guud:** Waa wadarta guud ee dakhliga ka dhashay iibinta alaabta ama adeegyada la xidhiidha hawlaha aasaasiga ah ee ganacsiga ka hor inta aanad ka jarin kharashaadka (kharashka alaabta, dheeraadka ah, iwm.)

**Heerka dulsaarka:** Waa boqolleyda hadhaaga amaahda (ama qaddarka amaahda) ee la siiyo dayn-bixiyuhu iyada oo qayb ka ah lacag bixintaada bisha. Midan waxaa loo muujiya boqollay ahaan (%) waana kharashka daynta. VCLF waxay samaysaa oo kaliya amaahda heerka "go'an", taas oo macnaheedu yahay in dulsaarku aanu isbeddelin inta lagu jiro muddada amaahda.

**Waajibaadka amaahda:** Waa waajib dhaqaale ama deyn u baahan in dib loo bixiyo.

**Sheegashada sharci ahaaneed:** Waa sheegasho sharci ah oo lahaanshaha ah in deyn bixiyuhu uu dul dhigo hantida qofka marka deynta ama waajibaadka lagu leeyahay. Ilaa inta daynta laga soo bixinayo, dayn bixiyuhu waxa uu sii haysanayaa sheegashadiisa hantida oo ah hanti loo isticmaalo dammaanad ahaan taas oo la mulkini karo ama la iibin karo haddii ay dhacdo in deynta la bixin.

**Qaddarka amaahda:** Waa qaddar gaar ah oo deyn ah oo uu bixiyo deyn-bixiyuhu, illaa xad go'an, kaas oo deyn-bixiyuhu isticmaali karo mar kasta oo ay u baahdaan. Deyn-bixiyuhu waxa uu bixinayaa dulsaarka waxa uu amaahday, marka wadarta cadadka la bixiyo, waxay dib u amaahan karaan ilaa xadka loo qoondeeyay ka dib markay dib u bixiyaan waxay amaahdeen.

**Kharashka Dukumentiga Amaahda:** Waa lacag hal mar ah in lagu daboolo kharashaadka la xidhiidha diyaarinta iyo habaynta dukumentiyada amaahda.

**Taariikhda kama dambaysta ah ee lacag bixinta:** Waa taariikhda ay tahay inaad soo celiso dhammaan lacagta hadhay ee lagugu leeyahay amaah ama deyn.

**Heshiiska amaahda guriga:** Waa heshiis sharci ah halkaas oo hay'ad maaliyadeed ay lacag amaahiso deyn-qaade oo ay ka qaadato dammaanad hantida si ay ugu isticmaasho dammaanad si ay u sugaan deynta. Deyn-bixiyuhu waxa uu siiya qadar lacag ah amaah-bixiyaha kaas oo dib loogu soo celiyo dulsaar iyo wakhti go'an gudahooda. Shuruudaha amaahda guryaha ee caadiga ah waa 30 sano halka kuwa kalena ay u dhexeeyaan 10 ilaa 25 sano.

**Dakhliga saafiga ah:** Waa wadarta guud ee dakhliga oo laga jaray kharashyada.

**Kharashka bixinta amaahda:** Waa lacag hal mar ah oo uu bixiyo dayn-bixiyuhu si uu u daboolo kharashaadka la xidhiidha habaynta amaahda cusub. Inta badan

waxaa lagu muujiyaa boqolkiiba inta deynta ah waxaana lagu soo ururiyaa xidhitaanka ama "bilawga" deynta.

**Lacagta Mulkiilaha bixiyo:** Waa marka mulkiile ganacsi uu kala baxo lacagaha uu ku isticmaalo isticmaalkiisa gaarka ah.

**Qiimaha aafiga ah ee Shakhsiga:** Waa qiyaas lagu qiyaaso hantida dhaqaale ee qofka. Tan waxaa lagu xisaabiyaa iyadoo lagu darayo wax kasta oo qiimo lacageed leh oo laga jarayo wax kasta oo lagugu leeyahay.

**Dammaanad Shaqsiyeed:** Waa ballanqaad sharci ah oo ah heshiis saxeexan oo u dhexeeya dayn-bixiye iyo deyn-qaade haddii aan deynta la bixin, shakhsiga bixinaya dammaanadda shakhsi ahaaneed wuxuu la wareegi doonaa mas'uuliyadda hadhaaga lacagta lagu leeyahay. Haddii deyn-bixiyuhu uu ku guuldareysto inuu bixiyo, shakhsiga shakhsi ahaan loo dammaanad qaaday ayaa mas'uul ka ah bixinta deynta maadaama ay ballan qaadeen hantidooda gaarka ah oo ay ballanqaadeen inay qaataan deynta. Deyn-bixiyeyaashu waxay u baahan karaan milkiilayaasha ganacsiga inay bixiyaan dammaanad shakhsi ah si ay u helaan maalgelin, iyagoo hubinaya in deynta la bixin doono haddii ganacsigu aanu awoodin inuu buuxiyo waajibaadkiisa ama uu ku guuldareysto bixinta deynta.

**Qadarka deynta asalka ah:** Waa qaddarka asalka ah ee lacagta lagu amaahday deey ahaan. Marka deynta dib loo bixiyo, qaddarka deynta asalka ah ee lagu leeyahay (ama "hadhaaga") ayaa hoos u dhacaya ama yaraado.

**Bayaanka Faa'iidada & Khasaaraha:** Waxa kale oo loo yaqaan bayaanka dakhliga, kani waa bayaan xisaabeedka soo koobaya dakhliga iyo kharashaadka mudada cayiman, badanaa sanad ama rubuc sanad.

**Socodka Lacagta caddaanka La Saadaaliyay:** Waa qiyaasaha dhaqdhaqaaqa lacagta caddaanka ah ee mustaqbalka ee ganacsiga inta lagu jiro wakhti go'an. Kuwani waa saadaasha lacagta soo galaysa iyo lacagta baxeeeyso, iyadoo lagu saleynayo macluumaadka maaliyadeed ee ganacsigu ee hadda. Lacagaha soo gala waxa lagu tilmaami karaa lacag loo qiyasaayo in la helay halka kuwa baxana lagu tilmaami karo lacag la saadaaliyay in ganacsigu lagu bixiyo. Saadaashan dhaqdhaqaaqa lacagtu waxay sidoo kale ku tiirsan yihiin xogta taariikhiga ah iyo isbeddellada.

**Maalgelinta Dalabka Iibka:** waa ikhtiyaar maalgelin muddo-gaaban ah halkaas oo hay'ad maaliyadeed ama deyn-bixiye ay siiso ganacsi raasamaal si ay u fuliso dalab macmiil oo gaar ah, taas oo u oggolaanaysa ganacsigu in ay lacag ku bixiso alaab-qeybiyeyaasha oo ay daboosho kharashaadka wax-soo-saarka ilaa macmiilku ka bixiyo alaabta ama adeegyada.

**Deynta dib loo habeeyay** waxa loola jeedaa in la beddelo shuruudaha heshiiska daynta ee jira ee u dhexeeya dayn-qaade iyo dayn-bixiye, inta badan si wax looga

qabto dhibaatada dhaqaale iyo in loo abuuro qorshe dib-u-bixineed oo waara ee amaahaha.

**Isha & Isticmaalka Miisaaniyadda:** Waa qalab maaliyadeed oo loo isticmaalo in lagu qeexo dakhliga iyo kharashyada mashruuc gaar ah ama muddo wakhti ah. Ujeeddadu waa in la qeexo meelaha la filayo in laga helo kheyraadka iyo sida ganacsigu u isticmaali doono lacagta.

**Ganacsiga bilawga ah:** Waa shirkad ku jirta marxaladeeda shaqo ee bilawga ah si ay ugu so saarto badeecad ama adeeg macaamiisha.

**Deynta mudnaanta hooseeysa:** Waxa loola jeedaa qaab deyn ama deyn ka hooseeya deymaha kale marka loo eego mudnaanta dib u bixinta haddii ay dhacdo in ganacsiga la xiro ama dhibaato dhaqaale.

**Shirkad hoosaad/shirkadaha xiriirka la leh:** Shirkad hoosaadi waa shirkad inta badan ay leedahay shirkad kale, oo loo yaqaan "shirkada weyn" ama "shirkada maareysa", oo leh in ka badan kala badh saamiyadeeda. Shirkadaha xiriirka leh waa marka shirkadda waalidku ay leedahay saamiga laga tirada badan yahay (in ka yar 50%) saamiyada.

**Muddada iyo Shuruuda Amaahda:** Muddada wakhtigu waa wakhti hore loo go'aamiyey oo uu dejiyey dayn-bixiyuhu. Amaahda muddada waxa lagu bixiyaa jadwal lacag bixineed oo hore loo qoondeeyay waxayna ku hadhaysaa dulsaar go'an.

**Raasumaalka shaqaynaya:** Waa lacag hal mar ah oo loogu talagalay in lagu taageero baahiyaha hawlgalka sida maaraynta agabka, mushaar bixinta, iyo waajibaadka maaliyadeed ee kale ee muddada gaaban.